

Baaq Beelwaynta Nuur Axmed

Ku: Gollaha sare ee dhaqanka Dhulbahante

Ku: Golahayaasha xukuumada Khaatumo State ee Soomaaliya

Ku: cidii ay khusayso.

Annagoo ah Aqoonyahanka , waxgaradka iyo odayaasha beelweynta Nuur Axmed waxaanu cambaaraynaynaa qoraal kusoobaxay mareegaha qaarkood taariikhdiisuna ahayd [5.11.2013] oo lagu been abuurtay laguna gefey Siyaasiyiin iyo odayaal ka mid ah beesha dhulbahante ee khaatumo.

Qoraalka taariikhdiisa aan kor ku xusnay waxaa ku saxeexnaa Niman sheegtay kuna hadlayey magaca beesha Ugaadhyahan.

Waxay ka hadleen inuu jirey shir Teleconference ah oo dhacay labadii bisha [2.11.2013] shirkaas oo ay ka hadleen dad aad u fara badan loogana hadlayey hawlaha khaatumo ayaa waxay si gaar ah u magcaabeen saddex qof oo ka mid ah dadkii faraha badnaa ee shirka ka hadlay 1) Dr. Cali Khalif Galaydh 2) Wasiirka Amniga khaatumo Maxammed Ducaale 3) Axmed Cabdi Xusseen (saakin).

Hadaba markii aanu samaynay baadhitaan la xidhiidha wixii shirka khaatumo lagaga hadlay iyo gaar ahaan hadaladii Sadexda siyaasi waxaa noo cadaatay in aanay jirin haba yaraatee wax u eg boorin dagaal taleex lagu qaado oo laga fahmi karo hadaladii Sadexda siyaasi ee kor ku xusan, ayna jireen dad badan oo kale oo ka hadlay shirka khaatumo si adagna uga hadlay shirka Taleex ka furmay iyo ka qaybgalkiisa.

Annagoo ah waxgaradka beesha Nuur Axmed waxaa waajib nagu ah inaanu iftiimino qodobada soo socda.

1- In beryahan dambe ay soo baxayaan rag ku qadhaabanaya magaca beesha Ugaadhyahan iyadoo la doonayo in lagu fushado dano siyaasadeed oo ku aadan ka qaybgalka maamulka Puntland iyadoo ay cadahay in ragga ku saxeexan baaqa aflagaadada iyo been abuurka ah ay yihiin kuwo qaarkood xilal ku magcaaban maamulka Puntland qaarna ay hadda olole ugu jiraan inay ka qayb galaan Puntland oo doorasho soo dhowdahay waxaana ka digeynaa in laga feejignaado dadka noocaas ah oo khatar ku ah midnimada iyo wadajirka beesha dhulbahante iyo khaatumo islamarkaana aanay xambaari karin kuna hadli karin magaca beelweynta ugaadhyahan maadaama ay dadaal ugu jiraan sidii loo fashilin lahaa Dhulbahante, Khaatumo iyo shirka khaatumo ee taleex.

2 - in Beelaha dhulbahante iyo inta ku bahowdey maamulka khaatumo aanay ka bixin ballantii ay la galeen degmada taleex oo ahayd in lagu heshiiyey inay Taleex noqoto Caasimadda dhulbahante iyo guud ahaan khaatumo, taas oo ay ka dhalanayso waajib guud oo taleex ka saaran qof kasta oo khaatumo ah maadaama aynu u xulanay caasimad ku meelgaadh ah waajibbaadkaas oo ay ka midyihiin Difaaceeda oo loo siman yahay sheegashadeeda oo loo siman yahay iyo ka shaqaynteeda oo loo siman yahay.

3-In aaney jirin Ugaadhyahan si gaar ah u wada leh taleex kana xigsan kara beelaha

dhulbahante ee kale ama guud ahaan kuwa wax ka dega sida Beesha Kaskiiqabe. Taleexna ay ka dhisan tahay gudi guurti ah ayna iyaga uun ka jawaabi karaan wixii kasoo hadha maamulka Khaatumo aaneyna jirin wax laga weydiinayo dad ku hadlay magaca ugaadhyahan.

4- In aanu ka bixinayno raali gelin buuxda gefkii lagula kacay hormuudka dhulbahante oo weliba ah mas, uuliyiin ka tirsan maamulka khaatumo oo kala ah

1- Dr Cali Khalif (xubin G11) 2-Maxammed Ducaale Wasiirka Amniga. 3-Axmed saakin (jaaliyadda khaatumo Sweden).

Magacyada ku saxeexan bayaanka:

- | | |
|---------------------------------------|--|
| 1-A/rashiid Ismaaciil Muse | 35-Oday Axmed diiriye Jaamac |
| 2-Cumar Saalax Afweyne | 36-khalid Adan Xirsi |
| 3-Cabdi Khalif Jaamac (dirir) | 37-Oday Aadan Bile cabdi |
| 4-Farxaan Haybe Maxammed | 38-Oday C/qaadir Yuusuf Mire |
| 5-Aadan Cali Ducaale | 39-A/raxmaan Gaani Cali Shire |
| 6-sandoon Naasir Maxammed agoon | 49-Axmed Cabdi Cali Koore |
| 7-Axmed Maxammed Cabdu | 50-Dr. Ibraahim Cali Koore |
| 8-maxamuud Cabdullaahi maxammed | 51-Dr.maxammed Cismaan Cigaal |
| 9-Dayib Maxammed Abdi | 52- Eng. Warsame Axmed Ciise |
| 10-Cabdullaahi xassan bulaale | 53-Dr.Maxammed Ciise X/shaacuur |
| 11-Cabdi samad Jaamac Sheywaan | 54-Oday Keyse Gurey Ducaale |
| 12-Farxaan Axmed Nuur | 55-Faarax Aadan Ciise Toohe |
| 13-mustafe Cabdillahi Cali nuux | 56-Dr. maxammed Salaad Dabcad |
| 14-Keyse Xaaji faarax | 57-Kornayl Hassan Maxammed Cabdi |
| 15-Cabdulqaadir Caydiid Cali Shire | 58-Oday Axmed Ismaaciil |
| 16-Abdulqaadir Abdi Cartan | 59-Oday Maxammed Ibraahim Xabashi |
| 17- Cabdi Cali Nuur Bileys | 60-Oday Muuse Faarax Warsame |
| 18-A/karin Caydiid Cali Shire | 61-oday Siciid Maxammed Cabdi Geele |
| 19-Jaamac Maxamuud Cartan | 62-Oday Cumar Yuusuf Cassayr |
| 20-maxamuud xassan jaamac | 63-Oday Xusseen Khaliif Jaamac (dirir) |
| 21-Dr. A/laahi Maxammed Muuse | 64-Oday Ali Maxammed Muuse |
| 22-Jaabir Faarax Gaas | 65-Oday Cismaan Muuse legdan |
| 23- Axmed Saxardiid Maxammed | 67-Oday C/raxmaan Xassan Jaamac Dirir |
| 24-A/rashid Aden Ciise Toohe | 68-Oday Axmed Xirsi Dawlad |
| 25-Maxammed Dheere Ibraahim Ciie | 69-Oday Cumar Cali Shire |
| 26-Abdi Bashiir Muuse | 70-Oday Alaal Food Warsame |
| 27-Yaasiin Diiriye Jaamac | 71-Oday Caynaanshe Dalmar Cali |
| 28-Ismaaciil C/raxmaan Calidarmaan | 72-Oday Axmed Faarax Cashuur |
| 29-Ismaaciil Cabdullahi Sheywaan | 73-Oday Jaamac Diiriye Maxammed Agoon |
| 30-Keyse Jaanac Saakax | 74-Oday Farxaan jaamac Cali Shire |
| 31-Dr. Maxammed Maxamuud Calidarmaan | 75-Abwaan A/rashiid M J Boos |
| 32-kornayl Maxammed Axmed calisarmaan | 76-Jebiyee Axmed Abdi |
| 33-Eng. Shariif Diiriye Garabyare | 77-Maxammed C/raxman Alidarmaan. |
| 34-Oday Muuse Ali Koore | |